# مَظَاهِرُ الكِبْرِ والاستِعلاءِ والصَّدّ عَنْ دِينِ اللّٰهِ عَزَّ وَجَلَّ

## Muuqaallada islaweynida iyo is sarraysiinta iyo ka leexinta diinta Alle cazza wajalla

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{سَأَصْرِفُ عَنْ آيَاتِيَ الَّذِينَ يَتَكَبَّرُونَ فِي الأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَإِنْ يَرَوْا كُلَّ آيَةٍ لا يُؤْمِنُوا بِهَا وَإِنْ يَرَوْا سَبِيلَ الرُّشْدِ لاَ يَتَّخِذُوهُ سَبِيلاً وَإِنْ يَرَوْا سَبِيلَ الْغَيِّ يَتَّخِذُوهُ سَبِيلاً ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَكَانُوا عَنْهَا غَافِلِينَ}

(**Waxaan ka leexiyaa aayaadkayga kuwa isugu kibriya dhulka si xaq darro, hadday arkaan aayaad kasta ma rumeeyaan hadday arkaan jidka hanuunka kama yeeshaan waddo, hadday arkaan waddada baadidana waxay ka yeeshaan jid, waxaana ugu wacan inay beeniyeen aayaadkanaga oy ahaayeen kuwo halmaamay**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago ahna mid ciso leh iyo xigmad.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa.

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Kuwa islaweyn ciribtooda way xun tahay adduun iyo aakhiraba, ha ahaadaan ummado ama fardi, halaagga ummadaha iyo magaalooyinka oo madaxtaagay oo kibray waa sunno oo ku fuleyso khalqiga Ilaahay (cazza wajalla) umana heli kartid sunnada Ilaahay baddalid ama leexin, wuxuu leeyahay Alle:

**{فَأَمَّا عَادٌ فَاسْتَكْبَرُوا فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَقَالُوا مَنْ أَشَدُّ مِنَّا قُوَّةً أَوَلَمْ يَرَوْا أَنَّ اللَّهَ الَّذِي خَلَقَهُمْ هُوَ أَشَدُّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَكَانُوا بِآيَاتِنَا يَجْحَدُونَ * فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ رِيحًا صَرْصَرًا فِي أَيَّامٍ نَّحِسَاتٍ لِّنُذِيقَهُمْ عَذَابَ الْخِزْيِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَلَعَذَابُ الْآخِرَةِ أَخْزَى وَهُمْ لَا يُنصَرُونَ }**

(**Reer Caad iyagu waxay isugu kibriyeen dhulka si xaq darro ah, waxayna dheheen yaa naga xoog badan miyeyna arag Allaha abuuray inuu ka xoog badan yahay waxayna ahaayeen kuwo aayaadkanaga inkirsan * Waxaanna ku dirnay korkooda dabayl qaylo daran toddobo maalmood oo u xun (iyaga) si aan u dhadhansiino cadaabka dulliga nolosha adduun, cadaabka aakhiraana ka sii dulli badan loomana gargaaro**), wuxuu leeyahaya Alle subxaanahu:

**{وَكَأَيِّن مِّن قَرْيَةٍ عَتَتْ عَنْ أَمْرِ رَبِّهَا وَرُسُلِهِ فَحَاسَبْنَاهَا حِسَابًا شَدِيدًا وَعَذَّبْنَاهَا عَذَابًا نُّكْرًا* فَذَاقَتْ وَبَالَ أَمْرِهَا وَكَانَ عَاقِبَةُ أَمْرِهَا خُسْرًا}**

(**Maxay badan tahay magaalo ka madaxtaagtay amarka Alle iyo rusushiisa, markaas ayaan xisaabinay xisaab daran cadaab adagna cadaabnay * waxayna dhadhamisay ciribta xaalkeeda xumaantiisa, ciribteediina ku dambaysay khasaare**).

Kibirka waa dambiga ugu horreeyay oo Alle in lagu caasiyo sababay, waa marka Ilaahay amray malaa'igta inay u sujuudaan Aadam, way sujuudeen Ibliis mooyee wuxuu yiri Alle:

**{وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلائِكَةِ اسْجُدُوا لآدَمَ فَسَجَدُوا إِلاَّ إِبْلِيسَ أَبَى وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ}**

(**Xus markaan ku niri malaa'igta u sujuuda Aadam, markaasay sujnudeen Ibliis mooye, wuu diiday wuuna iskibriyay, wuxuuna ka mid noqday galaada**).

Dadka islaweyn waxaa lagu gartaa astaamahooda xun aakhiro, sidii loogu garan jiray adduunka, wuxuu yiri Alle:

**{وَنَادَى أَصْحَابُ الأَعْرَافِ رِجَالاً يَعْرِفُونَهُم بِسِيمَاهُمْ قَالُوا مَا أَغْنَى عَنكُمْ جَمْعُكُمْ وَمَا كُنتُمْ تَسْتَكْبِرُونَ}**

(**Waxay u dhawaaqayaan dadka Acraafku rag ay ku garan calaamaddooda, waxayna ku oran waxba idiinma tarin badnaantiina (kulankiinna) iyo waxaad isku kibrinayseen**), sidaa awgeed islaamka wuxuu ka digay cirib xumida ay leedahay islaweynida, wuxuu ka dhigay mid ka mid ah sababaha naxariista Alle lagaga

fogaado wuxuu ugu gooddiyay dadka islweyn cadaab xanuun badan wuxuu yiri:

**{إِنَّ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِآيَاتِنَا وَاسْتَكْبَرُوا عَنْهَا لاَ تُفَتَّحُ لَهُمْ أَبْوَابُ السَّمَاءِ وَلاَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّى يَلِجَ الْجَمَلُ فِي سَمِّ الْخِيَاطِ وَكَذَلِكَ نَجْزِي الْمُجْرِمِينَ}**

(**Kuwa beeniyay aayadkanaga oo iska kibriyay looma furo iridaha cirka mana galaan Janada intuu ka galo Rati irbad dulkeed saasaana ku abaalmarinaa dambiilayaasha**), wuxuu yiri Alle:

**{وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ تَرَى الَّذِينَ كَذَبُوا عَلَى اللَّهِ وُجُوهُهُم مُّسْوَدَّةٌ أَلَيْسَ فِي جَهَنَّمَ مَثْوًى لِّلْمُتَكَبِّرِينَ}**

(**Maalinta qiyaamana waxaad arkeysaa kuwii ku been abuurtay Alle oo wajiyadoodu madow ah, miyayna Jahannamo dhexdeedu ahayn hoyga kuwa is kibriya**), wuxuu yiri rasuulka:

**(احْتَجَّتِ الجَنَّةُ والنَّارُ ، فقالتِ النَّارُ : فِيَّ الجَبَّارُونَ وَالمُتَكَبِّرُونَ ، وَقَالتِ الجَنَّةُ: فِيَّ ضُعَفَاءُ النَّاسِ وَمَسَاكِينُهُمْ ، فَقَضَى اللهُ بَيْنَهُمَا: إنَّكِ الجَنَّةُ رَحْمَتِي أرْحَمُ بِكِ مَنْ أشَاءُ ، وَإنَّكِ النَّارُ عَذَابِي أُعَذِّبُ بِكِ مَنْ أشَاءُ ، وَلِكلَيْكُمَا عَلَيَّ مِلْؤُهَا)**

(**Waxaa dooday jannada iyo naarta, waxay tiri naarta: waxaa igu sugan kuwa kibirka badan oo islaweyn, jannadana waxay tiri waxaa igu sugan dadka taagta daran oo masaakiinta ah, Alle ayaa kala**

**xukumay: adiga jannada ah waxaad tahay naxariistayda qofkaan rabo ayaan ugu naxariisanayaa, adiga naarta ah waxaad tahay cadaabkayga qofkaan rabo ayaan ku cadaabayaa mid kastana waa inaan buuxiyaa**), wuxuu yiri rasuulka:

**(... أَلا أخْبِرُكُمْ بِأَهْلِ النَّارِ؟ كُلُّ جَوَّاظٍ ... مُتَكَبِّرٍ).**

**(... Ma idin sheegaa dadka naarta galaya? Mid kastoo calool weyn... oo islaweyni badan**)

Waxaan shaki ku jirin in kibirka uu yahay dabeecad dhex deggan qalbiga bukan, qofka wuxuu noqon karaa mid rafaadsan oo wax haysanin oona ka mid ah dadka islaweyn, wuxuu noqon karaa qof hanti leh oo adduunka loo fidiyay haddana ka mid ah dadka tawaaduca, wuxuu yiri rasuulka:

**( لا يَدْخُلُ الجَنَّةَ مَنْ كَانَ فِي قَلْبِهِ مِثْقَالُ ذَرَّةٍ مِنْ كِبْرٍ) فَقَالَ رَجُلٌ: إِنَّ الرَّجُلَ يُحِبُّ أَنْ يَكُونَ ثَوْبُهُ حَسَنًا ، وَنَعْلُهُ حَسَنَةً ، فَقَالَ : (إِنَّ اللهَ جَمِيلٌ يُحِبُّ الجَمَالَ ، الكِبْرُ : بَطَرُ الحَقِّ ، وَغَمْطُ النَّاسِ )**

(**Jannada ma galayo qof qalbigiisa wax yar kibir ku jiro**) nin ayaa yiri: qofka wuxuu jecel yahay inay maradiisa fiicnaato kabtiisana fiicnaato, wuxuu yiri: (**Ilaahay waa qurux badan yahay wuuna jecel yahay quruxda, kibirka waa dafiridda xaqqa iyo yasidda dadka**), wuxuu ka mid yahay kibirka jirrooyinka nafsiga

iyo bulshada kuwa ugu halista badan oo nafta burburiya oo bulshada dumiya, qofkiisa waa mid ku kadsoon naftiisa oo iskaga weyneysiinayo dadka kale, wuxuu yiri Alle:

{إِنْ فِي صُدُورِهِمْ إِلاَّ كِبْرٌ مَا هُمْ بِبَالِغِيهِ}

(**Kuma jiro laabtooda waxaan kibir ahayn mana gaarayaan**)

Inkastoo kibirka uu ku jiro qalbiga laakin wuxuu leeyahay muuqaallo kasoo muuqda dhaqanka iyo mucaamalada, waxaa ka mid ah:

Dambi ku madaxtaagid iyo xaqqa inaan loo hoggaansamin, wuxuu yiri Alle:

{.... وَإِذَا قِيلَ لَهُ اتَّقِ اللَّهَ أَخَذَتْهُ الْعِزَّةُ بِالْإِثْمِ}

(**…marka lagu yiraahdo ka dhawrso Alle waxaa qabata isla weyni dambi dartiis**), qofka islaweyn wuxuu ku soconayaa daganaantiisa xun iyo islaweynidiisa liidato inuu diido xaqqa, uma kordhiso in xaqqa loogu yeero waxaan ahayn kibir iyo kadsoomid, naftiisa wuxuu galinayaa halaag, wuxuu yiri Alle:

{فَحَسْبُهُ جَهَنَّمُ وَلَبِئْسَ الْمِهَادُ}

(**Waxaa ku filan Jahannamo iyadaana u xun gogol**), waxaa jiro qof iskaweynaysiiyo nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - amarkiisa oo la kulmo abaalka islaweynidiisa iyo madax-adeyggiisa.

**فعن إِيَاسُ بْنُ سَلَمَةَ بْنِ الْأَكْوَعِ (رضي الله عنه) ، أَنَّ أَبَاهُ حَدَّثَهُ أَنَّ رَجُلًا أَكَلَ عِنْدَ رَسُولِ اللهِ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) بِشِمَالِهِ ، فَقَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (كُلْ بِيَمِينِكَ) ، قَالَ : لا أَسْتَطِيعُ ، قَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (لا اسْتَطَعْتَ) ، مَا مَنَعَهُ إِلَّا الْكِبْرُ ، قَالَ : فَمَا رَفَعَهَا إِلَى فِيهِ).**

Waxaa laga wariyay Iyaas bin Salama bin Al-akwac in abbihiisa u sheegay in nin ku cunay nabiga agtiisa gacantiisa bidix, wuxuu rasuulka yiri: (**ku cun midigtaada**) wuxuu yiri: ma awoodo, wuxuu yiri rasuulka: (**ha awoodin kama reebin waxaan ahayn kibir**), wuxuu yiri: afkiisa uma qaadin).

Waxaa ka mid ah: leexinta wejiga, waxaa laga wadaa in wejiga si islaweyni loo leexiyo waqtiga fiirinta, Ilaahay wuu raabay asoo ka hadlaya Luqmaan markuu wiilkiisa ku yiri:

**{وَلا تُصَعِّرْ خَدَّكَ لِلنَّاسِ وَلا تَمْشِ فِي الأَرْضِ مَرَحًا إِنَّ اللَّهَ لا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ}**

(**Hana ka jeedin wajiga dadka hana ugu socon dhulka kibir, Alle ma jecla mid kastoo islaweyn oo faan badan**),.

Waxaa ka mid ah: socodka in laysku weynaysiiyo waxaa laga wadaa in socodka istaagtaag iyo islaweyni wato, wuxuu yiri Alle:

**{وَلاَ تَمْشِ فِي الأَرْضِ مَرَحًا إِنَّكَ لَنْ تَخْرِقَ الأَرْضَ وَلَنْ تَبْلُغَ الْجِبَال طُولاً * كُل ذَلِكَ كَانَ سَيِّئُهُ عِنْدَ رَبِّكَ مَكْرُوهًا}.**

(**Hana ugu soconin dhulka kibir Illeen ma jeexi kartid dhulka kumana gaaraysid buuraha dherere * dhammaan waxaasna xumaantiisu rabbigaaga agtiisa waa lagu neceb yahay**).

Waxaa ka mid ah: in lagu faano alaabta iyo nimcada Alle - cazza wajalla - wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(خَرَجَ رَجُلٌ مِمَّنْ كَانَ قَبْلَكُمْ فِى حُلَّةٍ لَهُ يَخْتَالُ فِيهَا، فَأَمَرَ اللَّهُ الأَرْضَ فَأَخَذَتْهُ ، فَهُوَ يَتَجَلْجَلُ فِيهَا إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ)**

(**Nin ayaa soo baxay oo ka mid ah dadkii idinka horreeyay isagoo xiran iskujoog oo uu ku faanayay, Ilaahay wuxuu amray dhulka wuuna qabtay ilaa maalinta qiyaame wuu ku socdaa**), sida loogu faanayo dharka ayaa faanka ka suurtoobayo alaabta guryaha iyo gawaarida fuuliddooda iyo hanashada daaraha waaweyn iyadoo qaab islaweyni ah, iyo wixii kale raaxada adduunka ka mid ah

Waxaa ka mid ah: in layska sarraysiiyo dadka saboolka ah iyo danyarta iyagoo la yasayo, sidey isaga weynaysiiyeen mushrikiinta inay la fariistaan dadka saboolka saxaabada ah, Salmaan iyo Suhayb iyo Bilaal iwm. - Ilaahay dhammaan raalli haka noqdee -,

Mushrikiinta waxay ku dhaheen rasuulka: eryi kuwan yayna nagusoo dhiirranin, Ilaahay wuxuu soo dejiyay:

**{وَلاَ تَطْرُدِ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ}**

(**Hana eryin kuwa baryaya rabbigooda aroor iyo galabba iyagoo dooni wajigiisa**).

Waxaa ka mid ah qaababka iska sarreysiinta dadka saas oo kale: in loo yeero kaliya dadka hantida leh oo aan loo yeerin dadka saboolka marka waliimo ay jirto iyagoo la yareysanayo arrinkooda, wuxuu yiri Abuu Hureyra – Ilaahay raalli haka noqdee -:

**(شَرُّ الطَّعَامِ طَعَامُ الْوَلِيمَةِ ، يُدْعَى لَهَا الأَغْنِيَاءُ ، وَيُتْرَكُ الْمَسَاكِينُ).**

(**Waxaa ugu shar badan cuntada waliimada waxaa loo yeeraa dadka hantida leh waxaa laga tagaa dadka masaakiinta…**).

Sidaas oo kale waxaa ka mid ah kibirka: in layska sarreysiiyo salaanta ama in gacanta la galiyo qof darajo ahaan hooseeya yasid la yasayo awgeed, wuxuu ahaa rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - midka salaanta ku bilaabo qof weyn iyo qof yarba waxaa kusoo arooray xadiiskan:

**(أَنَّ رَسُول اللَّه (صَلَّى اللَّه عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) مَرَّ عَلَى غِلْمَانٍ فَسَلَّمَ عَلَيْهِمْ).**

(**In rasuuulka Alle uu soo maray ilmo wuuna salaamay**).

Kibirka waxaa ka mid ah: doodda in lagu madaxtaago iyo in lagu xadgudbo, shaki kuma jiro inay muslinka

xaaraan ka tahay inuu ka haajiro walaalkiisa muslinka ah wax ka badan seddex maalmood, illeen waxaa ku sugan isgoyn iyo dhib iyo fasahaad iyo gooddiga aakhiro, wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(مَـنْ هَجَـرَ أَخَـاهُ فَـوْقَ ثَـلاَثٍ فَهُـوَ فِـي النَّـارِ ، إِلاَّ أَنْ يَتَدَارَكَـهُ اللَّـهُ بِكَرَامَتِهِ)

(**Qofkii ka hijroodo walaalkiisa wax ka badan seddex wuxuu ku sugan yahay naarta, in Alle karaamadiisa la gaaro mooyee**), wuxuu yiri rasuulka:

(لاَ يَحِلُّ لِمُسْلِمٍ أَنْ يَهْجُرَ أَخَاهُ فَـوْقَ ثَـلاَثِ لَيَالٍ ، يَلْتَقِيَانِ فَيُعْـرِضُ هَذَا وَيُعْرِضُ هَذَا ، وَخَيْرُهُمَا الَّذِي يَبْدَأُ بِالسَّلاَمِ)

(**Uma bannaana muslinka inuu ka hijroodo walaakiisa seddex habeenood wax ka badan, way kulmayaan kan wuu jeedsanayaa kanna wuu jeedsanayaa, waxaa ugu khayr badan midkooda salaanta bilaabaya**), wuxuu leeyahay nabigeena:

(أَرْبَعٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ كَانَ مُنَافِقًا خَالِصًا ، وَمَنْ كَانَـتْ فِيـهِ خَصْلَةٌ مِنْهُنَّ كَانَـتْ فِيـهِ خَصْلَةٌ مِـنْ النِّفَـاقِ حَتَّـى يَـدَعَهَا : إِذَا اؤْتُمِـنَ خَـانَ ، وَإِذَا حَدَّثَ كَذَبَ ، وَإِذَا عَاهَدَ غَدَرَ ، وَإِذَا خَاصَمَ فَجَرَ)

(**Afar qofka ay ku sugan yihiin wuxuu noqonayaa munaafuq baraxtiran, qofkii caalaamo ka mid ah ay ku sugan tahay wuxuu wataa calaamad munaafuqnimo ah**

**ilaa uu ka haro: haddii amaano loo dhiibto wuu khiyaanaa, hadduu sheekeynayo been buu shaagaa, hadduu ballan galana wuu buriyaa, hadduu doodana wuu xadgudbaa**).

Islawynida sabab ayay u noqotay dad badan mushrikiinta ka mid ah inay islaamka soo gali waayayaan iyo inay dhahaan (Laa ilaaha illallaah), wuxuu yiri Alle:

**{إِنَّهُمْ كانُوا إِذا قِيلَ لَهُمْ لا إِلهَ إِلاَّ اللَّهُ يَسْتَكْبِرُونَ}**

(**Waxayna ahaayeen marka lagu dhaho Alle mooyee ilaah kale ma jiro kuwa iskibriya**), waxay ka santaagi jireen inay raacaan diin aan ahayn diinta aabbeyaashooda iyo awooweyaashooda, islaweyni darteed, Yahuudda waxay diideen inay raacaan nabiga iyagoo yaqiinsan inuu run sheegayo, wuxuu yiri Alle:

**{الَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ يَعْرِفُونَهُ كَمَا يَعْرِفُونَ أَبْنَاءَهُمْ وَإِنَّ فَرِيقًا مِنْهُمْ لَيَكْتُمُونَ الْحَقَّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ}**

(**Kuwaan siinay kitaabka waxay u yaqaanaan Nabiga (iyo xaquu la yimid) siday u yaqaanaan caruurtooda. koox ka mid ahna waxay qarin xaqa iyagoo og**), sidaas oo kale waa waxa ku xambaaray Banii israa'iil inay beeniyaan anbiyadooda oo ay qaarkooda dilaan wuxuu yiri Alle:

**{أَفَكُلَّمَا جَاءَكُمْ رَسُولٌ بِمَا لاَ تَهْوَى أَنفُسُكُمُ اسْتَكْبَرْتُمْ فَفَرِيقاً كَذَّبْتُمْ وَفَرِيقاً تَقْتُلُونَ}.**

(**Markastoo uu idiinla yimaado rasuul waxaan naftiinu jeclayn (xaqa) ma iskibrisaan, koox waad beenisaan, kooxna waa dishaan**).

Islaweynida waxay sabab u tahay gaalnimada iyo beeninta kuwa wax beeniyay ee ummadihii hore, wuxuu yiri Alle asoo ka hadlaya Nuux – nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**{وَإِنِّي كُلَّمَا دَعَوْتُهُمْ لِتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوا أَصَابِعَهُمْ فِي آذَانِهِمْ وَاسْتَغْشَوْا ثِيَابَهُمْ وَأَصَرُّوا وَاسْتَكْبَرُوا اسْتِكْبَاراً}**

(**Markasta oo aan u yeerana si aad ugu dambi dhaafto waxay farahooda yeelaan dhagahooda, maryahoodana way isku dadaan, wayna ku madax adaygaan xumaanta wayna is weyneeyaan iswenayn**), wuxuu yiri Alle asoo ka hadlaya qoom Huud:

**{فَأَمَّا عَادٌ فَاسْتَكْبَرُوا فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَقَالُوا مَنْ أَشَدُّ مِنَّا قُوَّةً}**

(**Reer Caad iyagu way isugu kibriyeen dhulka si xaq darro ah, waxayna dheheen yaa naga xoog badan**), wuxuu yiri asoo ka hadlaya qoom Saalix:

**{قَالَ الْمَلأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُواْ مِن قَوْمِهِ لِلَّذِينَ اسْتُضْعِفُواْ لِمَنْ آمَنَ مِنْهُمْ أَتَعْلَمُونَ أَنَّ صَالِحًا مُّرْسَلٌ مِّن رَّبِّهِ قَالُواْ إِنَّا بِمَا أُرْسِلَ بِهِ مُؤْمِنُونَ * قَالَ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُواْ إِنَّا بِالَّذِيَ آمَنتُمْ بِهِ كَافِرُونَ}**

(**Waxayna ku dheheen madaxdii iskibrisay oo qoomkiisa ka mid ah kuwii tabarta yaraa oo rumeeyay ma waxaad ogtihiin in saalax laga soo diray xagga Alle, waxayna dheheen Annagu waxa lalasoo diray waan rumaysan nahay * waxayna dheheen kuwii iskibriyay**

**annagu waxaad rumeeyseen waan ka gaaloownay**), wuxuu yiri asoo ka hadlaya qoom Shucayb:

**(قَالَ الْمَلأُ الَّذِينَ اسْتَكْبَرُواْ مِن قَوْمِهِ لَنُخْرِجَنَّكَ يَا شُعَيْبُ وَالَّذِينَ آمَنُواْ مَعَكَ مِن قَرْيَتِنَا أَوْ لَتَعُودُنَّ فِي مِلَّتِنَا)**

(**Waxay dheheen madaxdii iskibrisay oo qoomkiisii ah waxaannu kaa bixin Shucaybow adiga iyo kuwa ku rumeeyay magaaladanada ama waxaad ku soo noqon diintanada**), sidaas oo kale ummad kaste kibirtay ciribteeda waxay u dhamaatay halaag iyo baaba', waxaa baas leh ciribta, waxaa baas leh meel loo dhamaado, Waddada daawada qofka lagu ibtileeyay cudurkan xun waa inuu daaweeyo qalbigiisa, waa inuu garto naftiisa meesha ay taagan tahay, waa inuu eegaa asalka jirintaanka wax la'aan kaddib oo carro laga abuuray kaddib dhibic kaddib xinjir kaddib cad hilib kaddib siduu u noqday wax la sheego markuu ahaa kaddib wax aan jirin, ha ogaado addoonka islaweyn in lagu ciqaabayo maalinta qiyaame niyaddiisa wax cagsi ku ah, qofka niyaysta iska sarraysiin iyo u faanid khalqiga Ilaahay waxaa lasoo kulminayaa isagoo ugu dullaysan uguna naaqusan, wuxuu yiri rasuulka:

**(يُحْشَرُ الْمُتَكَبِّرُونَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أَمْثَالَ الذَّرِّ فِي صُوَرِ الرِّجَالِ ، يَغْشَاهُمُ الذُّلُّ مِنْ كُلِّ مَكَانٍ...)**

(**Waxaa lasoo kulminayaa kuwa islaweyn maalinta Qiyaame iyagoo la mid ah quraanshada oo leh qaab**

**niman waxaa daboolaya dulli oo uga imaanaya meel walba**), wuxuu yiri Alle:

**{تِلْكَ الدَّارُ الْآخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا فِي الْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا وَالْعَاقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ}**

(**Taasi waa daartii Aakhiro waxaanna u yeelnay kuwaan Doonayn sarraynta (kibirka) dhulka dhexdiisa iyo fasaad, ciribta (fiicanna) waxaa leh kuwa dhawrsada**)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Waxaa ka mid ah muuqaallada ka leexinta jidka Alle (cazza wajalla) isburinta hadallada iyo falalka, iyo in la sheegto qiime iyo dhowrsanaan, kuwa xoogga saara qaabka iyo muuqaalka, oo siiya mudnaanta qaabka uu

yahay qofka xataa haddii ay ka hor imaanayso arrintaas xaqiiqada, xataa hadduusan ahayn qofka sidan ah mid meel fiican ka jooga insaaniyadda iyo akhlaaqda oo ka dhigi karta mid lagu daydo, Illeen taas kama dhigayso qofka qaabkaas leh oo aan dhaqankiisa ku sallaysnayn diinta islaamka waxaa lagu tiriyaa waxyaalaha ugu muhimsan oo islaamka lagu burburiyo oona lagaga cararsiiyo dadka oo lagagana leexiyo jidka Ilaahay, kuwan oo kale waa kuwa uu ku rumoobayo hadalka rasuulka:

(إِنَّ مِنْكُمْ مُنَفِّرِين)

(**Waxaa idinka mid ah kuwa dadka cararsiiya**)

Hadduu yahay muuqaalka kuwa diinta leh muuqaalkooda oo ayna la socoto dhaqan xumo ama been ama laqdabo ama khiyaano ama hantida dadka oo baadil lagu cuno, arrinka aad buu halis u yahay halkan, wuxuu ka mid noqonayaa qofkiisa munaafuqiinta, siduu yahay xaalka kooxaha fallaagada ah oo diinta Ilaahay ka ganacsada inkastoo ay yihiin kuwa dugsiga u ah argagixinta oona kuwa ugu weyn taageera iyagoo u ordaya inay ridaan dowladaha ooyna daciifiyaan taasoo u sahlaysa - sidey sheeganayaan - inay xukunka qabsanayaan iyagoo arrinkaas waddo kaste usoo maraya wax kastana bannaysanaya, waxaa la mid ah kan kusoo koobaya diinta cibaadada kaliya iyo ku

dadaalkeeda isagoo si qaldan u fahansan diinta, kuna xeeldheeraanaya gaalaysiinta iyo hub qaadashada iyo dadka kulasoo bixidda, sidey sameeyeen Khawaarijta oo ahaa kuwa ugu badan dadka soonka iyo salaadda iyo salaatulaylka, laakin maysan qaadanin cilmiga sharciga oo ku filan oo ka reebaya inay dhiigga tiimbadaan, dadka ayay kulasoo baxeen seefahooda, hadday cilmi raadin lahaayeen wuu ka reebi lahaa, islaamka waa diinta naxariista, wax kastoo kaa fogeynaya naxariista Islaamka ayuu kaa fogeynayaa, waxaa la eegayaa dhaqanka toosan ee lama eegayo hadalka keliya, waxay yiraahdeen: hal nin xaalkii oo ku sugan kun wuxuu ka fiican yahay kun hadalkooda.

**Ilaahayow xaqqa noo tusi xaq ahaan naguna arsaaq raacitaankiisa, baadilkana baadil ahaan noo tusi naguna arsaaq ka fogaanshihiisa**